

Waraaqda Xaqiiqooyinka Xeerka Cuntada #20

Waxa loo baahan yahay in aad ka ogaato Xeerka

WWW.HEALTHOREGON.ORG
/FOODSAFETY

OAR 333-150-0000, CUTUBKA 3-201.18

(A) Cunta karinta iyo qaybinta cabitaanada ee banaanka ah ee ay samaynayso goobta cuntadu waa in loo ogolaado in ay qayb ka noqoto shaqada marka laga samaynayo dhismaha goobta cuntada.^{Pf}

(B) Lifaq ku saabsan howlaha cunta karinta iyo qaybinta cabitaanka ee banaanka ah loogama baahna in uu muhiim u yahay in cuntada laga ilaalinayo wasakhda maahane. Howsha cunta karinta iyo qaybinta cabitaanka ee banaanka ah waa in loo diyaariyaa qaab ka ilaalinaya cuntada, qalabka, maacuunta, waxyaabaha halka mar la isticmaalo iyo walxaha kale wasakhawga marka aan la isticmaalayn.

(C) Howsha cunta karinta iyo qaybinta cabitaanka ee banaanka ah waa in lagu qalabeeyaa ama ay ku taalaa meel ku dheggan qasabad gacmaha lagu dhaqdo. Howlaha cunto karinta iyo qaybinta cabitaanka ee banaanka ah kuwaas oo aan si rasmi ah meel ooga dhisnayn waa in ay keenaan hanaan gacmadhaqasho oo buuxinaya shuruudaha 5-203.11(C) haddii hay'adda maamulku ogolaato.^{Pf}

(D) Cunta karinta banaanka ah waa in ay ku ekaataa isticmaalka shiilista, kurshiinka oven-ka, tandoori oven, dhadhaarka shiilista ama qalab kale oo wax karin oo lamid ah. Istimaaalka qalabka sida dhardhaarka kor ka siman ama aaladda shiilista, woks, miisaska uumiga ama qalabka kale ee wax karinta, kaydinta ama haynta loo qaabeeyay ama loo diyaariyay in lagu isticmaalo gudaha goobta adeegga cuntada lama ogola.^{Pf}

(E) Marka laga tago cunto karinta, ma jiraan diyaarin, isukeenis, kaydinta ama adeeg cunto oo lagu samaynayo howlaha cunto karinta banaanka ah. Waxyaabaha cuntada lagu daro ee aan khatarta keenayn (non-TCS) ayaa lagu qaybin karaa hawsha cunto karinta ee banaanka.^{Pf}

(F) Shaqaalaha ama isticmaaleyaasha waxaa la siin karaa si toos ah ayaka oo uga imaanaya howlaha wax karinta banaanka ah haddii cuntada loo qaybinayo adeeg degdeg ah. Istimaaaleyaashu ma ahan in ay ayaku cuntada ka gurtaan howlaha cunto karinta banaanka ah.

(G) Qaybinta cabitaanka ee banaanka ah waxaa kamid noqon kara khamriga iyo cabitaanada kale. Istimaaaleyaashu ayaka ayaa iskood uga guran kara qalabka qaybinta cabitaanka kaasoo buuxinaya 4-204.13.

(H) Howlaha cunta karinta iyo qaybinta cabitaanka ee banaanka ah waa in uu maamulaa shaqaalaha adeegga cuntada.

(I) Qaybta 3-201.18 horay uguma soo darayso adeegga cuntooyinka lagu diyaariyay gudaha goobta ee la siinayo isticmaaleyaasha jooga meelaha banaanka ah ee la fariisto.

Cunto Karinta Banaanka

Maqaaxiyo badan ayaa jecel in ay goobtooda kusoo kodhiyaan meel banaanka ah oo cuntada lagu kariyo. Xarumaha cunta karinta banaanka ah waxaa kamid ah shiilista, kurshiinka oven-ka, tandoori oven, dhadhaarka shiilista ama qalab kale oo wax karin oo lamid ah.

Wax karinta banaanka ah kuma jiraan isticmaalka qalabka sida dhardhaarka kor ka siman ama dhidibada, woks, miisaska uumiga ama qalabka kale ee wax karinta, kaydinta ama haynta loo qaabeeyay ama loo diyaariyay in lagu isticmaalo gudaha goobta adeegga cuntada.

Ujeeddada cunto karinta banaanka ah ma ahan in la kordhiyo awoodda waxsoosaarka goobta ayada oo laga weecanayo xeerarka qabanaya goobaha cuntada ee gudaha.

Goob kasta oo shati haysata waa in ay maamulka caafimaadka bulshada ee gudaha ku wargalisaa kahor inta aysan dhisin/ku shaqayn goob banaanka ah oo cuntada lagu kariyo.

Shuruudaha Shaqada:

- Majiran diyaarin, isukeenis, kaydinta ama adeeg cunto oo lagu samaynayo howlaha cunto karinta banaanka ah. Dhammaan jarjaridda, is dhexgalinta, isku qasidda, iwm... waa in lagu sameeyaa gudaha goobta shatiga haysata
- Macaamiisha waxaa la siin karaa si toos ah ayaka oo ka imaanaya howlaha wax karinta banaanka ah haddii cuntada loo qaybinayo adeeg degdeg ah

- Macaamiishu ayaku isuma adeegayaan
- Waxyaabaha cuntada lagu daro ee aan khatarta keenayn (non-TCS) ayaa lagu qaybin karaa
- Howlaha cunta karinta banaanka ah waa in uu maamulaa shaqaalaha adeegga cuntadu
- Howlaha cunta karinta banaanka ah waa in loo qalabeeyaa, ama ay ku taalaa meel ku dheggan, qasabad gacmaha lagu dhaqdo in si rasmi ah loo dhisay maahane



Cuntada lagu kariyay qalabka loogu tala galay cunto karinta banaanka ah waa in markasta laga ilaaliyaa wasakhawga

- Dhamaan qalabka wax karinta banaanka waa in laga sameeyaa shay ammaan/heerka cuntada ah
- Waa in ay jirtaa meel banaan oo ku filan oo loogu tala galay goobaha goobta ku dhexyaala si loo diyaariyo looguna hayo cunto dheeraad ah oo ka imaanaysa howsha cunta karinta banaanka ah
- Ku ilaali cuntada inta lagu jiro qaadista iyo karinta weelal ku daboolan, dahaaran, iwm...